# Neefta
# Asthma (Somali)


Neeftu waa cudur sambabada ku dhaca oo sababi kara dhibaatooyin xagga neefsashada ah. Haddii ilmahaagu qabo neef, marinnada hawo-mareenka ee sambabadooda ayaa aad uga falceliya waxyaabo gaar ah, oo loo yaqaan kiciyeyaal. Kiciyeyaashu waxay keeni karaan weeraro/xanuun hal mar soo boodyo ah. Tani waa marka marinnada hawadu ay yaraadaan, bararaan, oo uuna diif ka buuxsamo. Neefta waa la xakameyn karaa, laakiin lama daweyn karo. Astaamaha neefta ayaa laga yaabaa inay ka soo roonaadaan marka ilmahaagu sii weynaado.

## Maxaa Dhaco Inta Lagu Jiro weerar/xanuunka halmar soo boodka ee neefta

Sadex shey ayaa dhaco inta lagu jiro weerarka lama filaanka neefta oo adkeyn karo neefsiga (Sawirka 1):

- Marinada hawo-mareenku way bararaan oo sii yaraadaan.
- Muruqyada ku xeeran marinnada hawadu way adkaadaan oona isku majuujismaan.
- Wadooyinka hawada waxaa ka buuxsamo diif/xab.

**Sawirka 1** Hawo-mareenka caadiga ah iyo hawo-mareen inta lagu jiro weerarka lama filaanka ah ee neefta.




 ©1978, Waxaa dib loo eegay 2022, Isbitaalka Carruurta ee Qaranka (Nationwide Children's Hospital) Sii socda…

## Aastaamaha Weerarka Lama Filaanka ah ee Neefta

**Aastaamaha digniinta**

Inta badan weerarka lama filaanka neefta wuxuu ku bilowdaa si tartiib ah. Waxaad ogaan kartaa isbadelo yar ee jirka canugaaga ah ka hor inta aysan bilaaban weerarka lama filaanka. Kuwaan waxaa ka mid ah:

- Qufac khafiif ah
- Cuncun ama biyo ka socoshada indhaha
- Daalka
- Hindhisada
- Cuncunka ama dhuun xanuunka
- Diif ka qulqulka ama san qoyanaanta

**Goorta la bilaabayo daawada badbaadinta**

Bilow daawada badbaadinta haddii aad dareento in ilmahaagu uu leeyahay:

- Qufac
- Neefsiga qeylida wata
- Neefsashada degdega ah ama taahitaanka leh
- Hiraanhirka
- Dhuuqsanaanta xabadka
- Ilma kastoo yar– neefsiga yareeyo inta lagu jiro nuugida ama quudinta

**Wac dhakhtarka cunugaaga ama daryeel bixiyahaaga caafimaadka**

Marka dawada badbaadadu aanay ku caawin ama aysan ahayn mid sii jirta 4 saacadood:

- Neefsiga degdega oo sii socdaa
- Hiraanhirka kordhaa
- Qufaca oo sii socda
- Dhuuqsanaanta xabadka
- Mataqida kadib qufacida

## Aastaamaha Halista ah – Aad Qolka Xaaladdaha Degdegga ah (Emergency Room, ER) ama soo wac 911

**Ilmahaagu waxa uu qaatay dawadii badbaadada laakiin waxa uu qabaa:**

- Bushimo iyo ciddiyo farro oo cawl ama buluug ah
- Neefsasho adag oo degdeg ah (xiiqsamaaya)
- Neefta oo ku adkaata taas oo ka dhigta iney ku adkaato in uu hadlo, socdo, wax cuno, ama wax cabbo
- Godad sanka oo ballaadha (sanqaroorada) marka uu neefsanayo
- Neefsasho qoto dheer oo muujinaysa lafaha feerahooda iyo muruqyada qoortooda

## Waxa la Sameeyo Inta Lagu Jiro Xilliga Ay Neeftu Kacdo

**Raac Qorshaha Tallaabada Neefta ee ilmahaaga haddii ay uu dhacdo weerarka lama filaanka ah.**

U sheeg cunugaaga inuu:

- U sheeg qof weyn (waalidka, macalinka, kalkaalisada dugsiga, tababaraha, ama carruur daryeelaha) ee ku saabsan dhibaatada neefsiga.
- Raac Qorshahooda Tallaabada Neefta.
- Sii daawooyinkooda badbaadada sida uu kuu tilmaamay dhaqtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaad.
- Isdaji oo iskuday inaad si tartiib ah oo qoto dheer u neefsatid.

## Waxyaabaha kiciya

Ogaanshaha kiciyayaasha ilmahaaga waxay kaa caawin kartaa inaad ka hortagto weerarada lama filaanka ah.

**Kiciyeyaasha ugu caansan:**

- Ku bukoonta qaboowga ama hargabka
- Busta cayayaanka
- Tayada hawada
- Cimilada
- Baranbarooyinka
- Caaryada
- U beylah noqoshada qiiqa sigaarka
- Budada ubaxa
- Xayawaanka rabaayad ah
- Murugada
- Jimicsiga

## Daawooyinka Neefta

Waxaa jiro labo nooc oo daawooyin ah oo daaweeya neefta:  daawooyinka badbaadinta (bogsashada degdega ah) iyo daawooyinka xakameeyeyaasha.

### Daawooyinka badbaadinta

Daawada badbaadinta ee ugu caansan waa Albuterol. Isticmaal marka uu weerarka lama filaanku bilaabmo. Daawooyinka badbaadinta:

- Si degdeg ah u shaqee si aad u furto marin-haweedka waxaana la isticmaali karaa 4-tii saacadoodba mar.

- Waxa loo isticmaali karaa si qalabka neef-qaade ahaan oo leh qeyb dhexaadka banaan. Qeyb dhexaadka banaani wuxuu caawiyaa in daawo badan la geliyo marin-haweedka.
- Waxa loo isticmaali karaa qaab aerosol-ka (mashiinka hawo-qaadashada), iyadoo la isticmaalayo mishiinka hawo qaadashada.

**Daawooyinka xakameeyayaasha ah**

Inta badan dadka qaba neefta sidoo kale waxay u baahanyihiin daawada(wooyinka) xakameeyayaasha ah. Daawada(wooyinka) xakameeyayaasha:

- Waxey gacan ka geystaan in ka fogeeyaan in marinnada hawadu ay ka falceliyaan waxyaabaha kiciyayaasha ah. Waxay yareeyaan bararka marin-haweedyada.
- Waxay gacan ka geysan karaan ka hortagga weerarada mustaqbalka ee kedis ah ee neefta.
- Waxaa la qaataa maalin kasta, xitaa haddii ilmahaagu uu caafimaad dareemayo.
- Ma **aha** in la joojiyo iyada oo aan lala hadlin dhakhtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka.

## Tallooyin

- Caaga gudo u neefsiga canugaaga iyo qabtaha caaga waa inuu wataan iyaga marwalba.
- Fiiri xaanshiyaha daawada ee neefta. Waxay kuu sheegeysaa sida iyo goorta la siinayo canugaaga daawada neefta, saameynada daawada suurtagalka ah, iyo waxyaabaha kale ee muhiimka ah ee ay tahay in la xasuusnaado. Weydii daaweeyaha kalkaalisada iyo neefmareenka haddii aadan helin kuwaan.
- Dib u buuxi daawada xakameeyaha canugaag bil kasta.
- Isticmaal Qorshaha Tallaabada Neefta ee canugaada. Waxay kuu sharxi goorta iyo sida loo siiyo daawo walba.
- Isticmaal xasuus qor si aad u dabagashid aastaamaha neefta iyo inta jeer oo uu canugaaga isticmaalo daawadooda badbaadinta. Haddii ay u baahan yihiin inay isticmaalaan qalabkooda badbaadinta ee gudo-u-neefsiga in ka badan 2 jeer toddobaad kasta, la socodsii dhakhtarkaaga ama bixiyahaada xanaanada caafimaadka.
- U sheeg macalinka, tababaraha, iyo kalkaalisada dugsiga ee ilmahaaga inay qabaan neef.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, weydii dhakhtarkayaga ilmaha ama bixiyahayaga daryeelka caafimaadka.